

SIDA LOO

Galo Iimaylka Amnigiisu Sugaan Yahay




Shabakadda Daryeelka Tooska ah ee Macmiilka (Consumer Direct Care Network, CDCN) waxay isticmaashaa hab nabdoon oo lagu diro Macluumaadka Caafimaadka ee Ilaalinsan (Protected Health Information, PHI). Dhammaan PHI waxa lagu soo diraa iimaylo amnigoodu sugan yahay. Si aad u aragto, waxaad u baahan doontaa inaad isdiiwaangeliso ama inaad gasho nidaamkeena fariinta ee amnigiisu sugan yahay. Hoos waxaa ku yaal tusaale ah sida fariin ammaan ah u ekaan karto (Jaantuska 01). **Xusuusnow, ma aha nuxur/fariin aan la rabin. Ha tirtirin.**


Sida La Isku Diiwaangeliyo

Haddii tani ay tahay markii ugu horeysay ee aad eegayso iimayl amnigiisu sugan yahay oo ka socda CDCN, waxaad u baahan tahay inaad isdiiwaangeliso. Tani way ka duwan tahay boggaaga websaydka ama marin u helkaada EVV. Halkan waxaa ku qoran sida aad ugu samaysan karto eray sireedka oo aadna isaga diiwaangelin karto nidaamkayaga iimaylka ee amnigiisu sugan yahay:


1. Ka dib markaad ka furto iimaylka qaybtaada farriimaha, isticmaal URL-ka "Click here (Guji halkan)" ama dooro **lifaaqa fariinta**. (Jaantuska 02)
2. Tani waxeey daah-furi doontaa shaashad baadhitaan. Dooro badhanka **Click to read message (Guji si aad u akhrido fariinta)**. (Jaantuska 03)
3. Waxaa lagu fari doonaa inaad sameysato akoon. Geli cinwaankaada iimaylka oona guji **Continue (Sii socio)**. (Jaantuska 04)




Jaantuska 01



Jaantuska 02




Jaantuska 03



Jaantuska 04

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad sameysato eray sireed.

1. Geli magacaaga koowaad iyo kaaga u dambeeya, ka dibna sameyso eray sireedka. Xaqiiji inaad raacdo tilmaamaha marka aad samaysanayso eray sireedkaaga. (Jaantuska 05)
 - Ku ilaasho eraygaaga sirta ah si badbaado ah, waxaad ugu baahan doontaa inaad isticmaasho mar kasta oo aad ka hesho iimayl amniigiisu sagan yahay CDCN.
2. Koodhka ansixinta ayaa loo soo diri doonaa iimaylkaaga. Ka eeg qeybtaada farriinta, **iyo galkaada nuxurka aan loo baahneyn/waxyaabaha aan macnaha lahayn**, koodhka oona geli sanduuqa.
3. Dooro **Continue (Sii soco)**.
4. Waxaad heli doontaa iimayl kale oo uu ku jiro linki si aad u hawlgeliso akoonkaaga. Haddii aadan arag farriinta, **eeg galkaada nuxurka aan loo baahneyn/waxyaabaha aan macnaha lahayn**. (Jaantuska 06)



Jaantuska 06

Jaantuska 05

Gelitaanka

Haddii aad hore isu diiwaangelisay oo aad rabto inaad eegto ama dirto iimayl:


- Ku qor iimaylkaaga iyo eraygaaga sirta ah shaashadda soo gelitaanka oona taabo **Continue (Sii soco)**. (Jaantuska 07)

OGOW: Markaad isku diiwaan geliso akoon, marka xigta ee aad rabto inaad akhrido fariin amnigeedu sagan yahay, waxaa lagu soo muujin doonaa shaashad si aad ugu soo gasho adigoo isticmaalaya eraygaaga sirta ah.

Jaantuska 07

Kaydinta Farriintaada

Sida iimaylka oo kale, waa Ka jawaabi-celin kartaa, U jawaab celin kartaa dhammaan, oo aadna Gudbin kartaa fariimahaaga amnigoodu sugan yahay. Haddii aad furto fariintaada amnigeedu sugan yahay iyo haddii kaleba, waxay dhacaysaa 90 maalmood ka dib. Haddii aad ugu baahan tahay fariinta in ka badan 90 maalmood, waxaad isticmaali kartaa ikhtiyaarka **Save As (U Keydi Sida)** si aad u soo dejisato fariinta. (Jaantuska 08)



Jaantuska 08

- Save Message Body as HTML - waxay u soo dejisanaysaa nuxurka fariinta sida <message subject>.html.
- Save as Zip Archive – waxa ay u soo dejisanaysaa fariinta iyo lifaaqyada la xidhiidha sida <message subject>.zip.
- Save as EML Message – waxa ay u curisaa fariinta RFC2822 sida ku salaysan nuxurka fariinta Secure Reader. Doorashadan kuma jirto sawirrada xogtooda lagu daro faylka.


Beddelida Eray-sireedkaaga

Laga bilaabo shaashadda gelitaanka iimaylka amnigiisu sugan yahay, taabo **Forgot Password (Hilmaamay Eray-sireedka)**. (Jaantuska 09)

- Fariinta dib u dejinta eray-sireedka ayaa lagu soo diri doonaa iimaylkaaga. (Jaantuska 10)


Ka eeg qaybtaada fariinta iyo galkaada nuxurka aan loo baahneyn/waxyabaha aan macnaha lahayn haddii aadan arag.

- Kadib waxaa lagu muujin doonaa shaashad aad gelineyso eray-sireed cusub. (Jaantuska 11)




Jaantuska 09

OGOW: Haddii eray-sireedkaagu dhaco ka hor intaadan fursad u helin inaad dib u dejiso, waxaa lagu sheegi doonaa inaad dib u dejiso marka xigta ee aad akhrido fariin amnigeedu sugan yahay.



Jaantuska 10



Jaantuska 11